Macluumaadkaaga. Xuquuqahaaga. Mas'uuliyadahaaga.

OGEYSIISKA HABDHAQANNADA ASTURNAANTA
WAAXDA ADEEGYADA AADANAHA IYO BULSHADA EE DEGMADA KING

Taariikhda Dhaqangalka: Febraayo 16, 2026

Ogeysiiskan wuxuu qeexayaa sida macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan loo adeegsan karo loona sheegi karo:

- ***Sida macluumaadka caafimaadka ee adiga kugu saabsan laga yaabo in loo adeegsado oo loo shaaciyo***
- ***Xuquuqahaaga marka la eego macluumaadka caafimaadkaaga***
- ***Sida loo soo gudbiyo cabashada ku saabsan ku xadgudubka asturnaanta ama sugnaanta macluumaadka caafimaadkaaga, ama xuquuqahaaga khuseeya macluumaadkaaga***

Fadlan si taxadir leh dib-u hubin ugu samee.
Waxaad xaq u leedahay nuqulka Ogeysiiskan (oo qaab warqad ama elektaroonig ah) iyo in aad kala hadasho Sarkaalka Asturnaanta Waaxda Adeegyada Aadanaha iyo Bulshada ee Degmada King adiga oo adeegsanaya telefoon 206-263-6920 iyo email DCHS_Privacy@kingcounty.gov haddii aad qabtid wax su'aalo ah.

King County

Qaybta 1aad: Xuquuqahaaga marka la eego Macluumaadka caafimaadkaaga

Marka la eego macluumaadkaaga, waxaad leedahay xuquuqaha qaarkood. Qaybtan waxaa ay sharxaysaa xuquuqahaga iyo qaar ka mid ah mas'uuliyadaheenna si aan kuu caawino.

Hel nuqulka macluumaadka caafimaadkaaga

- Waxaad codsan kartaa in aad aragto ama hesho nuqulka macluumaadka caafimaadkaaga ee aan adiga kaa hayno. Inna weyddii sida tani loo sameeyo.
- Waxaan bixin doonnaa nuqulka ama warbixinta kooban ee macluumaadka caafimaadkaaga, caadi ahaan 30 maalmood gudahooda ee codsigaaga.

Inna weyddii in aan saxno macluumaadka caafimaadkaaga

- Waxaad ina weyddiin kartaa in aan saxno macluumaadka caafimaadkaaga haddii aad u maleynayso in ay tahay mid khalad ah ama aan dhammeystirnayn. Inna weyddii sida tani loo sameeyo.
- Waxaan codsigaaga kaga jawaabi karnaa “maya”, laakiin waxaan qoraal kuugu sheegi doonnaa sababta 60 maalmood gudahooda.

Codso war-isgaarsiin sir ah

- Waxaad ina weyddiisan kartaa in aadn kuula soo xiriirno si gaar ah (tusaale ahaan, telefoonka guriga ama xafiiska) ama in aan boostada kuugu soo dirno annaga oo adeegsaneyna cinwaanka aad doorato.
- Waxaan tixgelin doonnaa dhammaan codsiyada suuragalka ah oo waa in aan kuugu jawaabnaa “haa” haddii aad noo sheegto in aad khatar-geli doontid haddii aanan aqbalin codsiyadaada.

Na weyddii in aan xaddidno macluumaadka aan isticmaalno ama wadaagno

- Waxaad ina weyddiisan kartaa in aadan u wadaagin macluumaadka caafimaadkaaga ujeeddooyin daaweyn, lacag-bixin, ama hawlgalladeenna. Looma baahna in aan oggolaano codsigaaga waxaanna oran karnaa “maya” haddii ay saameyn karto daryeelkaaga.
- Uma wadaagi karno macluumaadkaaga isticmaalka maandooriyaha ujeeddooyin daaweyn ama lacag-bixin la'aanta oggolaanshahaaga oo qoran.

Hel liiska kuwa aan macluumaadkaaga la wadaagnay

- Waxaad codsan kartaa liis (loo yaqaanno “xisaabin”) ee waqtiyada aan wadaagnay macluumaadka caafimaadkaada ee lix sano ka hor taariikhda aad weyddiisatay, cidda aan a wadaagnay iyo sababta aan u wadaagnay.
- Waxaan kuddari doonnaa dhammaan waqtiyada aan macluumaadkaaga wadaagnay, marka laga reebo kuwa ku saabsan daaweynta nidaamsan, lacag-bixinta iyo hawlgallada daryeelka caafimaadka.

Codso shaacinta hay'adaha kale ee ku lugta leh daryeelkaaga ee dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha ee hadda iyo mustaqbalka

- Waxaad xaq u leedahay in aad weydiisato liiska waqtiyada aan u wadaagnay macluumaadkaaga daaweynta xanuunka isticmaalka maandooriyaha ujeeddooyin daaweyn, lacag-bixin, ama hawlgallada daryeel caafimaad. Liiskan wuxuu ka hadli karaa ilaa saddex sano ka hor taariikhda aad codsigaaga sameyso waxaanna ka mid noqon doonna cidda aan macluumaadka la wadaagnay iyo sababta aan ula wadaagnay.

Hel nuqulka ogeysiiskan asturnaanta

- Waxaad weyddiisan kartaa nuqul waraaq ah oo ogeysiiskan ah waqti kasta, xitaa haddii aad oggolaatey in aad ogeysiiska u hesho elektaroonig ahaan. Waxaan ku siin doonnaa nuqul waraaq ah.

Dooro qof adiga ku matala

- Haddii aad qof siisay awoodda wakiil sharciyeed ee daryeelka caafimaad ama haddii qof uu yahay qof sharci ahaan mas'uul kaa ah, qofkaasi ayaa sameyn kara kala-doorashooyinka ku saabsan macluumaadka caafimaadkaaga.
- Waxaan hubin doonnaa in qofku uu awooddan leeyahay oo uu ku matali karo ka hor inta aan wax tallaabo ah qaadin.

Cabasho soo gudbi haddii aad dareento in xuquuqahaagi lagu xadgudbay

- Cabasho ayaad soo gudbin kartaa haddii aad dareento in aan ku xadgudubnay xuquuqahaaga adiga oo warqad u diraya 401 Fifth Avenue, Suite 500, Seattle, WA 98104, Attn: Sarkaalka Asturnaanta ama Xafiiska Xuquuqaha Madaniga ah ee Waaxda Adeegyada Aadanaha iyo Caafimaadka ee Mareykanka adiga oo warqad u diraya 200 Independence Avenue S.W., Washington, D.C. 20201, wacaya 1-877-696-6775 ama booqanaya www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/complaints/.
- Kaama aarsan doonno adiga iyadoo sababtu tahay in aad cabasho soo gudbisay.

Qaybta 2aad: Isticmaaladeenna iyo Shaacinteenna: Sidee ayaan caadi ahaan u isticmaalnaa ama u wadaagnaa macluumaadka caafimaadkaaga?

Gacan ka geysashada maareynta daaweynta daryeelka caafimaadka ee aad hesho

- Waxaan isticmaali karnaa macluumaadka caafimaadkaaga waxaanna la wadaagi karnaa xirfadlayaasha ku daaweynaya, isuduwaya daryeelkaaga ama kaa caawinaya in aad guri hesho (haddii aadan guri haysan). *Tusaale: Adeeg bixiye ayaa noo soo diraya macluumaad ku saabsan adeegyadaada daaweynta si aan u qabanqaabino caymiskaaga ama isugu duwno adeegyada dheeraadka ah.*
- Kaama aarsan doonno adiga iyadoo sababtu tahay in aad cabasho soo gudbisay.

Maamulidda hay'adeenna

- Waxaan adeegsan karnaa oo aan shaacin karnaa macluumaadkaaga si aan u bixino adeegyada wax-ku-ool ah.
  Tusaale: Waxaan dib-u-eegi karaa macluumaadkaaga si aan u aragno sida wanaagsan ee adeegyada aan bixino ay u shaqeeyaan iyo si aan u helno siyaabo aan ku bixin karno daryeel wanaagsan.

Bixinta kharashaadka adeegyadaada caafimaad

- Waxaan u adeegsan karnaa oo aan u shaacin karnaa macluumaadkaaga caafimaadka bixinta kharashaadka adeegyadaada caafimaad.
  Tusaale: Waxaan la wadaagnaa macluumaadka adiga kugu saabsan Waaxda Adeegyada Bulshada iyo Caafimaadka ee Gobolka Washington iyo Hay'adda Daryeelka Caafimaadka si loo bixiyo kharashaadka adeegyada aad hesho.

Qaybta 3aad: Isticmaaladeenna iyo Shaacinteenna: Sidee kale ayaa isticmaali karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadkaaga?

Waxaa naloo oggol yahay ama nalaga doonayaa in aan macluumaadkaaga u wadaagno siyaabo kale. Caadi ahaan waxay u dhacdaa siyaabo wax-ku-biirriya danta guud, sida caafimaadka dadweynaha iyo cilmi-baarista. Waa in aan buuxinnaa shuruudo badan oo sharciga ku xusan ka hor inta aan macluumaadkaaga u wadaagin ujeeddooyinkan awgood. Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeg: www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/index.html

Gacan ka geysashada arrimaha caafimaadka guud iyo bedqabka

Waxaan u wadaagi karnaa macluumaadka caafimaadka adiga kugu saabsan xaalado gaar ah, sida:

- Ka-hortagga cudurrada.
- Ka soo warbixinta xadgudub, dayacaadda, ama tacaddiga qoyska ka dhex dhaca ee la tuhmo.
- Ka-hortagga ama yareynta khatar weyn oo ku wajahan caafimaadka ama bedqabka qof kasta.

Ujeeddo cilmi-baariseed

Waxaan u adeegsan karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaga ujeeddooyinka cilmi-baaris caafimaad.

U-hoggaansamidda sharciga

Waxaan la wadaagi doonaa macluumaadkaaga haddii shuruucda gobolka ama federaalka ay sidaas naga doonayaan, oo ay ku jirto Waaxda Adeegyada Caafimaadka iyo Aadanaha (DHHS) haddii DHHS ay rabto in ay aragto in aan u hoggaansamayno sharciga federaalka ee asturnaanta.

Wax-ka-qabashada magdhowga shaqaalaha, sharci fulinta, iyo codsiyada kale ee dowladda

Waxaan u adeegsan karnaa ama u wadaagi karnaa macluumaadkaaga caafimaad:

- Ujeeddooyinka xaqsheegashada magdhowga shaqaalaha.
- Ujeeddooyinka sharci fulinta ama in lala wadaago sarkaal ka tirsan sharci fulinta – xaalado gaar ah oo xaddidan kaliya.
- In lala wadaago hay'adaha la-socoshada caafimaadka ee hawlaha uu sharcigu oggol yahay.

Ka jawaabista dacwadaha iyo tallaabooyinka sharciga

Waxaan wadaagi karnaa macluumaadka caafimaad ee adiga kugu saabsan si aan uga jawaabno amar maxkamadeed ama amar maamul, ama u yeeris maxkamadeed.

Isticmaallada iyo Shaacinnada Kale

Isticmaallada iyo shaacinnada kale ee aan lagu qeexin Ogeysiiskan waxaa lagu samayn doonaa oo kaliya oggolaanshahaaga qoraalka ah.

Qaybta 4aad: Isticmaalladeenna iyo Shaacinteenna ee Macluumaadka Dhibaatooyinka Isticmaalka Maandooriyaha

Sirta macluumaadka ku saabsan dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha waxaa lagu ilaaliyaa xeernidaamiyeyaal ka adag xeernidaamiyayaasha loo dejiyey macluumaadka caafimaad guud. Tusaale ahaan, uma wadaagi karno

macluumaadkaaga ee ku saabsan dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha ujeeddooyin daaweynta, bixinta kharashaadka, ama maamulida hay'adeenna iyada oo aan lahayn oggolaanshahaaga oo qoraal ah.

Shuruudaha oggolaanshaha

- Waxaad bixin kartaa hal oggolaansho oo ku saabsan dhammaan adeegsiyada ama shaacinnada mustaqbalka ee macluumaadkaaga ee ujeeddooyinka daaweynta, bixinta kharashaadka, iyo hawlgallada daryeelka caafimaadka.
- Waxaad joojin kartaa oggolaanshahaaga waqti kasta adiga oo noogu sheegaya qoraal. Baajinta waxaa ay dhaqan-gashaa marka aan helno. Tani ma beddeli doonto mana baabi'in doonto wax adeegsiyo ama shaacin ah oo horey u dhacay iyadoo lagu saleynayo oggolaanshihii hore ee aad bixisay.
- Xitaa marka macluumaadkaaga lagu wadaago oggolaanshahaaga, qof kasta oo helaa waa in uu raacaa isla xeerarka sir ilaalinta. Mar kale ma wadaagi karaan adiga oo aan oggolaan.

Shaacinnada aan oggolaanshaha lahayn

Sharciga federaalka wuxuu noo oggol yahay ama naga doonayaa in aan dad la wadaagno macluumaadkaaga ku saabsan dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha, xitaa adigoo aan qoraal ahaan u oggolaan, xaaladaha soo socda:

- Hawlwadeennada caafimaadka inta lagu jiro xaalad caafimaad oo degdeg ah
- Mas'uuliyiinta marka la soo sheegayo tuhunka xadgudub ama dayacaad carruur
- Si looga soo warbixiyo fal dambiyeed la tuhunsan yahay
- Ujeeddooyin cilmi-baaris, baaris hantidhowr, ama qiimeyn
- Marka uu u baahan yahay amar maxkamadeed
- Marka lala shaqeynayo hay'ad adeeg oo la xaqiijiyay si waafaqsan heshiis la ansixiyay

Isticmaallada iyo shaacinnada kale ee macluumaadkaaga ku saabsan dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha ee aan lagu qeexin Ogeysiiskan waxaa lagu sameyn doonaa oo kaliya oggolaanshahaaga oo qoraal ah.

Ilaalinta ka dhanka ah in macluumaadkaaga loo isticmaalo nidaam sharci:

- Macluumaadkaaga ku saabsan dhibaatooyinka isticmaalka maandooriyaha - ama markhaati-fur kasta ee ku saleysan - looguma isticmaali karo maxkamadda si adiga kaa dhan ah adigoo aan bixinin oggolaanshahaaga qoraal ah oo cad ama amar maxkamadeed.
- Haddii aan helno amar maxkamadeed, waa in lagugu soo wargeliyaa oo lagu siiyaa fursad aad kaga doodi karto.
- Amarka maxkamadeed waa in uu la socdaa u yeeris maxkamadeedsi si loo dhaqan-geliyo shaacinta macluumaadka.

Qaybta 5aad: Mas'uuliyadahaaga

Asturnaanta iyo Amniga macluumaadkaaga caafimaadka

- Sharcigu wuxuu naga doonayaa in aan ilaalino asturnaanta iyo amniga macluumaadkaaga caafimaadka.
- Waxaan si degdeg ah kuugu soo wargelin doonnaa haddii uu dhaco xadgudub xogeed oo laga yaabo in uu khatar geliyay asturnaanta ama amniga macluumaadkaaga. Xadgudubyada sharciga iyo xeernidaamyada federaalka waxaa lagu wargelin doonnaa mas'uuliyiinta ku habboon iyadoo loo raacayo xeernidaamyada federaalka.
- Waa in aan raacnaa hab-dhaqannada waajibaadka iyo asturnaanta ee lagu sharaxay ogeysiiskan, waa in aan sidoo kale ku siinaa nuqul ka mid ah.
- Macluumaadkaaga uma isticmaali doono ama uma wadaagi doono si ka baxsan sida halkan lagu sharaxay, haddii aad qoraal ahaan noogu sheegto mooyaane. Haddii aad noo sheegto in aan isticmaali karno, waxaad go'aankaaga beddeli kartaa waqti kasta. Qoraal ahaan noogu soo sheeg haddii aad go'aankaaga beddesho.

Dib-u-shaacin:

- Marka la wadaago, qaar ka mid ah macluumaadkaaga waxaa dib u shaacin kara qofka helay, mana lagu ilaalin doonna isla xeerarka.

Isbeddellada ku yimid Shuruudaha Ogeysiiskan
Waxaan beddeli karnaa shuruudaha ogeysiiskan, isbeddelladana waxaa ay khuseyn doonaan dhammaan macluumaadka aan kaa hayno. Ogeysiiska cusub waa la heli karaa marka la codsado waxaanna sidoo kale laga heli karaa bogeenna internetka, waxaanna nuqul kuugu soo diri doonaa boostada.

Qaybta 6aad: Macluumaad Dheeraad Ah

Si aad u hesho macluumaad dheeraad ah eeg:

- www.hhs.gov/ocr/privacy/hipaa/understanding/consumers/noticepp.html.
- Fact Sheet 42 CFR Part 2 Final Rule | HHS.gov

Waaxdada Adeegyada Aadanaha iyo Bulshada ee Degmada King
Privacy Officer (206)-263-6920
401 Fifth Avenue Suite 500, Seattle, WA 98104
email-ka: DCHS_Privacy@kingcounty.gov